MARKA AYNU DHAMAANTEEN DIB WAX U WARSHADEYNO AYAYNU DHAMAANTEEN GUULEYSANAYNAA

FÖRPACKNINGS INSAMLINGEN

Markasta oo aad baako ama wargeys aad geyso dib u warshadeynta, ayay tani tahay wax aad u weyn.

Furarka dhalooyinka ee duuga ayaa loo rogi karaa biraha baabuurta laga sameeyo. Baakada oomada ee madhan ayaa waxa ay tusaale ahaan noqon kartaa kaartoon pizzaha oo kabaha lagu rito. Warqadii wargeysyada shalay ayaa waxay noqonayasa mid cinwaanada maqaalka bari ku yaalaan. Khayraadka dabiiciga ah ee bay'ada ayaa mar labaad dib loo isticmaalaa iyadoo tamar badanna la keydinaayo. Marka aynu sidaas oo kale sameyno, ayaynu dhamaanteen gacan ka geysanaynaa in aan abuurno adduun ka wanaagsan oo aynu ku noolaano.

DIB U WARSHADENTA

Dhammaan baakooyinka iyo wargeysyada la soo ururiyey ayaa loo qaadaa dib u warshadaynta si ay ugu noqdaan baakooyin cusub ama alaabooyin cusub. Baakooyinka balaastikada ah ayaa waxa tusaale ahaan laga sameeya, Bacaha iyo weelsaha dib u warshadaynta. Dhalooyinka wax lagu shubto iyo waraaqaha wax lagu duubo waxay badanaa noqonayaa baakooyin badan. Biraha wax lagu rito ayaa noqon kara digsiyadda sheega gaariga iyadoo wargeysyadu ay noqon karaan waraaqaha wax lagu tirtiro ama wargeys cusub oo dib wax loogu soo daabaco.

MASUULIYADA SOO SAARAHA

Waxaynu Iswiidhan leenahay sharci loo yaqaano masuuliyadda soo saaraha. Tani micnaheedu waxa weeye in shirkadaha wax soosaara ama iibiya baakooyinka iyo ay mas'uul ka yihiin soo ururinta iyo dib u warshadeynta alaabtooda. Waxa Förpackningsinsamlingen, FTI, aanu u shaqeynaa kombaniyadaas. Waxaanu rabnaa inaanu kuu dhib yareyno si aad dib ugu warshadeyn karto isla markaana aad kor ugu qaado faa'iidooyinka deegaanka ay dib u warshadayntu u leedahay. Laakiin waxaanu u baahan nahay adiga caawimadaada si aanu ugu guuleysano.

XARUMAHA DIB U WARSHADENTA

FTI ayaa waxa ay mas'uul ka tahay dhammaan goobaha dib u warshadaynta ee aan shaqaale joogin ee ku yaalla Iswiidhan. Kuwaasi waa meelaha ay tahay inaad geyso wargeysyada iyo caagada wax lagu soo riddo, warqadaha, biraha iyo dhalada dib loo warshadeeyo. Haddii aad ku nooshahay guri dabaq leh oo leh meel dadka ka dhaxeysa oo dib u warshadeynta, waa inaad halkaa geyso wargeysyadda iyo xirmooyinka.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Waxaad **www.fti.se/hitta-atervinningsstation** ka helaysaa goobta dib u warashadeynta ee kuugu dhow iyadoo aad arki karto marka laga qaadaaayo ee la nadiifinaayo. Waxaad sidoo kale aad halkan ka heli kartaa tilmaamaha sida loogu kala soocaayo, fiidiyeyaasha ku saabsan dib u warshadaynta, tilmaamo iyo talooyin, iyo macluumaad ku saabsan ururkayaga.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan dib u warshadeynta wargeysyada iyo baakadaha, fadlan nagala soo xidhiidh **kontakt@ftiab.se** ama naga soo wax telefoonka **08-566 144 00**. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan qashinka waaweyn, qudhminta qashinka, qashinka korontada ama arrimaha kale ee qashinka, fadlan la xidhiidh kamuunkaaga/maamulka deegaankaaga ama wax dheeraad ah ka akhriso **www.sopor.nu**.

Kala saar wax badan

Si aad noogu ogolaato in inta qashinka ah ee ugu badan ee suurtogalka ah dib loogu warshadeeyo, ayaanu ugu baahannahay caawimadaada. Baakadu waa inay gebi ayaan wada madhnaato oo ay qallalnaato. Haddii aad haysato baako laga sameeyay waxyaabo ka badan hal shey, waa inaad ugu kala saartid maaddada aad u malaynayso inay ugu miisaanka badan tahay. Waad mahadsan tahay

BAAKADAHA BALAASTIKADA KA SAMAYSAN

Tusaale ahaan: Dhalooyinka, daasadaha, bacda balastiga, bacda balastiga dib wax loogu shubto, tuunbooyinka balastiga, baakadaha jibista iyo Buushka/goomada.

- Ka saar waxkasta oo fur ama dabool ah. Bacdaada ku kala rid noocyada weelka u gaar ah noocyada kala duduwan ee baakooyinka caaga ah. Waxay hadhow dhib yaraynaysaa dib u warshadeynta.
- Waxyaalaha balastiga ah ee aan aheyn baakooyinka waa in lagu tuuraa meesha qashinka waawey ama ka guriga, tusaale ahaan, qalabka guryaha iyo alcaabta. Quraaradaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynayaa si lacag laguugu soo celiyo.

BAAKADAHA WARAAQAHA KA SAMAYSAN

Tusaale ahaan: Baakadaha baastada, karaatoonta caanaha iyo casiirka, kiishashka warqadaha, kartoonka kabaha, kartoonka tuunbada oo kale ah ee xaanshida musqusha, kartoonada.

- Isku dumi oo laba jee risku laab. Baakadaha yaryar ku dhex rid baakadaha waaweyn si aad ugu keydiso boos.
- Baqshadaha waa in loogu kala saaro sida qashinka guriga ama qashinka la gubi karo. Wargeysyada, waraaqaha yarar ee xayeeysiinta iyo wixii la mid ah waxaa la dhexdhigayaa weelka loogu talagalay wargeysyada.



BIRTA WAX LAGU SHUBTO

Tusaale ahaan: Qasacadaha raashinka, qasacadaha wax lagu buufiyo ee faaruqa ah, tuubooyinka, furarka iyo daboolada, qasacadaha rinjiga.

- Qalooci furka seefta ee qasaacadaha birta.
- Daasada uu ku jiro rinjigu ama hadhaaga xabagtu waa in la geeyo weelka khashinka khatarta ah. Birta duugga ah, waxyaalaha tuubooyinka biyaha, daawaha wax lagu dubto iyo alaabooyinka kale ee aan aheyn kuwa wax lagu rito, ayaa la geynayaa meesha qashinka waaweyn ama guriga. Daasadaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynayaa si lacag laguugu soo celiyo.

DHALADA WAX LAGU SHUBTO

Tusaale ahaan: Dhalooyinka midabka leh ama bilaa midabka ah iyo joogaga.

- Ka fur afka, daboolka iyo furka kadibna kala saar sida alaabtaas looga faa'iideysto. Quraaradaha midabka leh iyo kuwa aan midabka laheyn midwalba gee weelka loogu talo galay.
- Quraaradaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynayaa si lacag laguugu soo celiyo. Booshiliinka, dhoobada iyo alaabooyinka kale ee aan aheyn kuwa wax lagu rito, waa in la geeyaa meesha qashinka waaweyn ama guriga. Guluubyada iyo laanbadaha waa in caadi ahaan la geeyo xarunta dib uga faa'ideysiga kamuunka ee shaqaalahu joogo.

WARGEYSYADA

Tusaale ahaan: Wargeysayada maalinlaha iyo todobaadlayaasha ah, joornaalada, kaatalogyada, waraaqaha yaryar ee xayaysiiska, buuqaga xusuus qorada iyo waraaqaha qoraalka-/sawiraada.

- Ka saar bacda balastiga ee ku duuban iyo xaashiyaha xayeysiiska ee ku dhagan.
- Baqshadaha iyo buugaagta isku tolan waa in loogu kala saaro weelka qashinka guriga ama qashinka la gubi karo. Bacaha warqada ee wax lagu qaado, kartoonada iyo wixii la mid ah waxaa lagu ridayaa weelka baakeedada waraaqaha.

fti